

# Telefishinka London ayaa laga dhigi doonaa dijital bisha Abriil 2012



## **Maxaa dhacaya?**

Seenyaalihii hore ee telefishinka ayaa la demin doonaa waxaana lagu beddeli doonaa seenyaale telefishin oo dijital ah oo cusub oo kii hore ka xoog badan bisha **Abriil 2012**.

# 1

## Maxaa igu waajib ah in aan sameeyo?

### Haddii aad haysato:

- **Freeview, BT Vision ama Top Up TV:**  
Waxaad u baahan doontaa in aad dib u habayso telefishinkaaga ama qalabka aad ku daawato bisha Abriil. Fiiri **bog. 4** si aad u ogaato habka aad taas u samaynayso
- **Sky TV, Virgin ama Freesat:**  
addii aad adeeggan ku haysato telefishinnadaada DHAMMAANTOOD uma baahan doontid in aad wax samayso.
- **Telefishin aanan ahayn dijital** (oo lagu fiirsado uun shan idaacadood):  
Telefishinkaaga ka dhig dijital haddii kale ma shaqayn doono ka dib bisha Abriil 2012

# 2

## Goormee ayuu isbeddelku dhacayaa?

Bisha **Abriil 2012** waxaa la demin doonaa seenyaalihii hore ee telefishinka waxaana lagu beddeli doonaa seenyaale dijital ah. Waxay taasi u dhici doontaa laba qaybood:

**4ta Abriil**

**Seenyaalaha idaacadda BBC Two ayaa la demin doonaa**

**18ka Abriil**

**Idaacadaha BBC One, ITV, Channel 4 iyo Channel 5 ayaa la demin doonaa**

Waxaa idaacadahaas lagu beddeli doonaa kuwo dijital ah.

### 3 Miyuu rikoodhkaygu weli shaqayn doonaa?

Ka dib bisha Abriil 2012, haddii rikoodhkaaga cajaladaha fidiyowga ama DVD-gu uusan dijital ahayn, kuma duuban kartid idaacad gaar ah inta aad mid kale daawanayso. Rikoodh telefishin oo *dijital* ah oo keliya ayaad sidaas ku samaysan kartaa. Rikoodhka telefishinka ee dijital ah waxuu weliba telefishinkaaga ka dhigi doonaa dijital.

### 4 Sidee ayaan u helaa telefishinka dijital ah?

Waxaad dooran kartaa adeegga matalan ah Freeview, waxaad soo rakiban kartaa adeeg dayaxgacmeed ama xarkaha dhulka sida Sky TV ama Virgin, ama waxaad iibsan kartaa telefishin dijital ah. Adeegyadaas qaarkood, sida Freeview iyo Freesat waxaa lagu heli karaa kharash mar keliya la bixiyo. Adeegyada kale, sida Sky TV, waxaad u baahan doontaa in aad bil kaste lacag ka bixiso.

### 5 Goormee ayaan dib u habeeyaa telefishinkayga?

Haddii aad haysato Freeview, waxaad u baahan doontaa in aad telefishinkaaga dib u habayso oo aad idaacadaha dib u baarto maalinta **4ta Abriil** iyo mar kale maalinta **18ka Abriil**. Waa in aad weliba dib u habayso telefishinka haddii aad aragto in idaacadaha qaarkood ay kaa maqan yihiin.

# 6 Sidee ayaan dib ugu habeeyaa telefishinkayga?

Waxaad dib u habaynaysaa adigoo isticmaalaya qalabka lagu kala beddelo idaacadaha. Sidan ayaad u samaynaysaa:

- 1 Daar telefishinkaaga ama qalabkaaga Freeview ah. Ka dibna riix qaybta **'menu'** ee qalabka lagu kala beddelo idaacadaha
- 2 Dooro xulashada **'set up'** ama **'installation'**. Ama haddii aad sawirro ku leedahay qalabka lagu kala beddelo idaacadaha, dooro sawirka sanduuqa qalabka, saxanka dayaxgacmeed ama baanadda
- 3 Haddii lagu weydiiyo lambar sir ah, ku tijaabi **0000** ama **1234**
- 4 Dooro xulashada **'full re-tune'**. Waxaa taas mararka qaar loo yaqaanaa **'first time installation'**, **'factory reset'**, **'default settings'** ama **'shipping conditions'**.  
Ha dooran **'channel update'** ama **'add channels'**
- 5 Riix qaybta **'OK'** haddii lagu weydiiyo in aad tirtirto idaacadahaaga dhammaantood
- 6 Idaacadaha si toos ah ayaa loo furi doonaa. Waxaa dhici karta in telefishinkaagu is demiyo oo uu dib u isku daaro.



## 7 Wixii ku saabsanna anteenadayda telefishinka?

Waxaad u baahan doontaa anteeno haddii aad doorato Freeview, BT Vision ama Top Up TV. Haddii aad iminka hesho sawir fiican, waxaa la filanayaa in aadan u baahnayn anteeno cusub.

## 8 Maxaa dhacaya haddii aan ku noolahay guri kuwa is saaran ah?

Haddii aad ku nooshahay guri kuwa is saaran ah, waxaa markaa la filanayaa in aad seenyaalahaaga ka hesho anteeno la wadaago. Waxaad u baahan doontaa in aad la hadasho qofka maamula gurigaaga si aad u hubiso in uu diyaar yahay.



## 9 Ma jiraa gargaar dheeraad ah?

Haddii aad 75 jir tahay ama ka weyn tahay, ama aad qabto naafooyin gaar ah, waxaad gargaar ka heli kartaa Qorshaha Gargaarka (Help Scheme), ee ay BBC-du maamusho. Waxaad helaysaa:

### Waxaad helaysaa:

- Qalab fudud in aad isticmaasho
- Rakibe la aqoonsan yahay oo kuu keena qalabka kuuna rakiba
- Adeeg daryeel dambe muddo laba iyo toban bilood ah xataa gargaar lagaa siiyo dib u habaynta telefishinka


Adeegga waxaa laga bixiyaa **£40** laakiin waa bilaash haddii aad qaadato kaalmooyinka dakhliga qaarkood. Qorshaha Gargaarka ayaa warqad kuu soo diri doona laakiin waxaad soo wici kartaa khadka caawinta ee bilaash ah **0800 40 85 900** waxaanad na weydiisan kartaa in aad turjumaan la hadasho.



Qorshaha Gargaarka waxaa maamusha BBC-da



# 10 Halkee ayaan ka heli karaa warbixin dheeraad ah?



Waxaad soo wici kartaa lambarka **08456 50 50 50\*** si aad af Ingiriisi ugula hadasho lataliye, ama waxaad qofkaas weydiisan kartaa in uu kuu gudbiyo turjumaan.

Haddii kale, waxaad warbixin dheeraad ah heli kartaa marka aad booqato boggayaga internetka ee af Ingiriisi ku qoran ee ah **digitaluk.co.uk**



get set for digital

\*Wicistu waa u bilaash macaamiisha BT marka ay ku jirto qorshooyinka wicista. Lacago kaladuwan ayaa laga qaadi karaa macaamiisha shirkadaha kale. Saacadaha ganacsiga ee ay furan tahay xarunta xiriirka ee Digital UK waa 8da subaxnimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha iyo gka subaxnimo ilaa 5ta galabnimo maalinta Sabtida. Xiran Axadda. Saacadaha furnaanta waxaa la kordhin doonaa goorta wareegidda ee xaafad kaste. Digital UK, PO Box 26833, Kirkcaldy, KY2 9AG